

Qabyo qoraalka manhajka cilmiga bulshada: Ku biir wada hadalka

Maarso 14, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dadka reer Alberta waxa mar kale lagu martiqaadayaa inay bixiyaan jawaab celin ku saabsan barashada muhiimka ah ee manhajka cusub ee cilmiga bulshada.

Toddobadii bilood ee la soo dhaafay, Waxbarashada Alberta (Alberta Education) waxay la shaqaynaysay waxbarashada iyo la-hawlgalayaasha bulshada, oo ay weheliyaan khabiir ku takhasusay horumarinta manhajka, si ay u horumariyaan manhaj cusub oo cilmiga bulshada ah. In ka badan 300 oo wada hawlgalayaal waxbarasho ah, macalimiin, ururo dhaqamo kala duwan, bulshooyinka asaliga ah iyo kuwa ku hadla luqadda franciiska ayaa ku hawlanaa ururinta jawaabcelin qiimo leh si ay gacan uga geysato ogeysiinta horumarinta qabyo qoraalka cusub ee dugsiya barbaarinta ilaa fasalka 12 (K-12) dulmar manhajka waxbarashada bulshada iyo qabyo qoraalka K-6 manhajka cilmiga bulshada. Ka qaybgal labaad oo dadweyne ayaa hadda furan illaa Maarso 29. Dadka reer Alberta waxay akhrin karaan manhajka cusub ee K-6 oo ay bixiyaan jawaab celintooda.

"Waad ku mahadsan tihiin bah wadaagta waxbarashada, ururada bulshada iyo Alberta ka kuwaas oo gacan ka geystay horumarinta manhajka cusub ee cilmiga bulshada. Wax ku biirintaada qiimaha leh waxay gacan ka geysan doontaa hubinta in ardayda Alberta ay wax ka bartaan manhajka dhisaya fikirkooda muhiimka ah, xallinta mashaakilaadka iyo xirfadahooda go'aan gaarista, awoodna u siinaya inay ku lug yeeshaan muwaadiniinta. Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan dadka reer Alberta inay wadaagaan ra'yigooda ku saabsan barashada muhiimka ah ee manhajka barashada bulshada, waxaan rajeynayaa fursado badan oo iskaashi mustaqbalka."

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada

Geedi socodka wada tashiga waxa uu bilaabmay xagaagii 2023, markaas oo wasiirka waxbarashadu uu la kulmay bah-wadaagta kala duwan ee waxbarashada si loo dhiso fahamka habraaca hawlgelinta ee la cusboonaysiiyay iyo hannaanka horumarinta manhajka ee hore loo socdo, oo ay ugu horreyso cilmiga bulshada.

Deyrtii 2023, iyada oo qayb ka ah habka ka qaybgalka wejigiisa, reer Alberta waxay dhammaystireen in ka badan 12,800 sahan online ah si ay u bixiyaan fikrado ku saabsan waxa ay jeclaan lahaayeen ardaydu inay ku bartaan manhajka cusub ee cilmiga bulshada. Natiijooyinka sahanka ayaa muujiyay in dadka reer Alberta ay aaminsan yihiin horumarinta xirfadaha fekerka muhiimka ah iyo fahamka dhacdooyinka maxalliga ah, Kanadiyaanka iyo kuwa caalamiga ah, iyo taariikhda caalamiga ah iyo kuwa qaranku waa inay noqdaan walxaha muhiimka ah ee manhajka cusub ee cilmiga bulshada.

Tan iyo markaas, Waxbarasha Alberta (Alberta Education) waxay la kulantay macalimiin badan, wada hawlgalayaal waxbarasho, bulshooyinka asaliga ah iyo kuwa ku hadla luqadda franciiska, iyo ururada dhaqamada kala duwan si ay u ogeysiiyaan baaxadda iyo isku xigxiga manhajka daraasaadka bulshada ee K-12 iyo waxa ku jira manhajka qabyada ah ee K-6. Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa inay la shaqeeyso lahawlgalayaasha waxbarashada iyo Albertans si loo hubiyo aragtidooda iyo jawaab-celinta in la tixgeliyo waqtiga saxda ah ee habka horumarinta.

Maamulka dugsiyadu waxay heli doonaan fursad ay ku tijaabiyaan manhaj cusub oo barashada bulshada ee K-6 ee fasallada sannad dugsiyeedka 2024-25 si ay u bixiyaan jawaab celin faahfaahsan oo dheeraad ah.

Waxbarashada Alberta waxay si taxadar leh u tixgelin doontaa jawaab celinta dhammaan hawlaha ka-qaybgalka, cilmi-baarista iyo tijaabada fasalka si loo dhamaystiro manhajka cusub ee barashada bulshada ee K-6 ka hor intaan la hirgelin.

Xaqiiqooyinka Muhiimka ah:

- Dulmarka manhajka cusub ee waxbarashada bulshada ee K-12 waa soo koobid heer sare ah oo ah waxay ardaydu ku bartaan fasal kasta waxayna tusinaysaa sida waxbarashadu u socoto marka ardaydu u gudbaan darajooyin.
- Manhajka cusub ee barashada bulshada ee K-6 waa dukumeenti macallimiintu isticmaali doonaan, iyaga oo siinaya sharraxaad faahfaahsan waxa ardayda laga filayo inay ogaadaan, fahmaan oo ay awoodaan inay sameeyaan dhammaadka fasal kasta.

Xog la xiriirta

- Qabyo Qoraalka K-12 Dulmarka Mawduuca Waxbarashada Bulshada (Ingiriis) ([Draft K-12 Social Studies Subject Overview \(English\)](#))
- Qabyo Qoraalka K-12 Dulmarka Mawduuca Waxbarashada Bulshada (Faransiis) ([Draft K-12 Social Studies Subject Overview \(French\)](#))
- Qabyo qoraalka K-6 manhajka cilmiga bulshada ([Draft K-6 social studies curriculum](#))
- Aragtidaada ka dhiibo ([Have your say](#))

Warar la xiriira

- Mudnaanta dadka reer Alberta ee manhajka cusub ee cilmiga bulshada (Diisambar 14, 2023) ([Albertans' priorities for new social studies curriculum](#) (December 14, 2023))
- Kala hadalka dadka reer Alberta manhajka cusub ee cilmiga bulshada (Sebtembar 18, 2023) ([Talking to Albertans about new social studies curriculum](#) (September 18, 2023))

Warbaahinta kale duwan

- Daawo wararka shirarka ([Watch the news conference](#))

Weydiimaha warbaahinta

Gabrielle Symbalisy

780-218-8916

Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada